

## Macluumaadka Cagaarshowga B ee Dumarka Uurka leh

### Waa maxay cagaarshowga B?

- Cagaarshowga B waa cudur beerka ku dhaca oo uu sababo fayras. Dad badan oo uu ku dhaco cagaarshowga B, fayrasku jidhka ayuu ugu sii jiraa, isaga oo u keena jirro nolosha oo dhan ah.
- Cagaarshowga B wuxuu sababi karaa dhibaatooyin caafimaad oo halis ah muddo ka dib, oo ay ku jiraan waxyeellaynta beerka, hawlgaabnimada beerka, iyo kansarka beerka.
- Inta badan dadka qaba cagaarshowga B ma yeeshaan calaamado waxaana laga yaabaa inaysan ogeyn inay qabaan, laakiin wali waxay u gudbin karaan dadka kale.
- Dumarka uurka leh waa in laga baaro cagaarshowga B xilli kasta oo ay uur yeeshaan.

### Maxay tahay sababta dumarka uurka leh loo baaro?

- Haddii qofka uurka leh laga helo cagaarshowga B, ilmahooda waa in la daweyyaa marka uu dhasho. Dhallaanka la daweyyo marka ay dhashaan waa dhif in uu cagaarshowga B qaado.
- Marka dhallaanka uu ku dhaco cagaarshowga B, waxay aad ugu dhowdahay inay sii qabaan caabuqa cimrigooda oo dhan.

### Maxaad samayn haddii aad qabto cagaarshowga B oo aad uur leedahay?

- La tasho bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga si aad ugala hadasho sida loo maaraynayo caabuqa cagaarshowga B.
- Waxaa jira daawayno diyaar ah oo yarayn kara halista uu cagaarshowga B ugu gudbi karo ilmahaaga.

Minnesota Department of Health  
Perinatal Hepatitis B Program  
PO Box 64975  
St. Paul, MN 55164-0975  
651-201-5414, 1-877-676-5414  
[www.health.state.mn.us/hepatitis](http://www.health.state.mn.us/hepatitis)

31/1/23

Si aad xogtaan ugu hesho qaabab kale, wac: 651-201-5414.

### Sideed uga difaaci kartaa ilmahaaga inuu qaado cudurka?

- Haddii aadan garanayn inaad qabto cagaarshowga B, weydii bixiyahaaga inuu dalbado baaritaanka dhiigga cagaarshowga B.
- Haddii aadan qabin cagaarshowga B, weydii bixiyahaaga tallaalka cagaarshowga B.
- Haddii lagaa helo cagaarshowga B, ilmahaagu wuxuu u baahan doonaa daaweyn iyo dabagal:
  - Ilmahaagu waxa uu heli doonaa qiyaasta ugu horraysa ee taxanaha tallaalka iyo difaaca dhiigga ee cagaarshowga B (HBIG) kadib dhalashada.
  - Ilmahaagu wuxuu u baahan doonaa inuu dhammaysto taxanaha tallaalka cagaarshowga B.
  - Taxanaha tallaalka ka dib, takhtarkaagu wuxuu ka qaadi doonaa dhiig si uu u hubiyo in ilmahaagu ka difaac qabo cagaarshowga B.
- Waa ammaan in la naas-nuujiyo xitaa haddii aad qabto cagaarshowga B.

